

IBB MA GALO

FAAFIN



RASMI AH

الرسمية

الجريدة

EE JAMHURIYADDA DIMUQRADIGA SOMALIYA

Sannadka 3aad Muqdisho, 1 Junyo 1975

L. 6

Laanta Faafinta Rasmiga ah ee Madaxtooyada Golaha Sare ee Kacaanka

FAAFIN BIL SOO BAXA

جريدة شهرية

QIIMADU: waa 5 shilin lambar waliba — RUKUNKA: Sanadii waa Sh. 100 Somaliya gudeheeda — dibaddedana waa Shs. 300. Rukunka la weydiisto waqtiga loo gooyey wuxuu ka bilabmaa 1 Janayo. Qiimaha qortitaanku F. R. halkii sadar iyo waxii ka yar waa 2 laba shilin — Rukunka iyo qoritaanku waxaa la weydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah — Lacagta waxaa lagu bixinayaa Xafiiska Canshuraha ee Wasaaradda Lacagta

KOBNIIN

BOGGA KOWAAD

SHARCI

SHARCI L. 37, Tr. 4 Juunyo 1975 — *Awood Siin.*

Bog. 449

BOGGA LABAAD

XEER

XEER MADAXWEYNAHA GOLAHA SARE EE KA-CAANKA, Tr. 25-5-1975, L. 75 — *Dhisidda Guddiga Sare Maamulka Wakaalada Degedaha.*

» 450

XEER WASAARADDA ARRIMAHA GUDAHA, Tr. 15 Majio 1975, L. 76 — *Magacaabidda Guddiyada Kacaanka ee Degmooyinka.*

» 452

XEER WASAARADDA HAWLAHA GUUD, Tr. 10 Majio 1975, L. 77 — *Dhul Dowladeed la siiyay, Gacantana loo geliyey Axmed Maxamed Aadan.*

» 454

- XEER WASAARADDA GANACSIGA, Tr. 2 Junyo 1975,
L. 78 — *Diwaan Gelin Iskashatada Ganacsiga Alaabta
Farshaxanka «Wadajir».* Bog. 456
- XEER WASAARADDA GANACSIGA, Tr. 2 Junyo 1975,
L. 79 — *Diwaan Gelinta Iskashatada Ganacsiga Muu-
ska ee lagu magacaabo Banaadir.* » 456

BOGGA SADDEXAAD

TALOOYIN ISGARSIIN OGEYSIIS IYO WIXII LA MID AH

- WASAARADDA HAWLAHA GUUD, Tr. 5 Majio 1975,
Naada Dhul — *Jaalle Sheekh Cosmaan Maxamed Xaji.*
(80) Bog. 458
- WASAARADDA HAWLAHA GUUD, Tr. 5 Majio 1975,
Naada Dhul — *Jaalle Cabdullahi Axmed Maalin.* ((81) » 458
- WASAARADDA HAWLAHA GUUD, Tr. 27 Majio 1975,
Naada Dhul — *Jaalle Buraale Faarax.* (82) » 459
- WASAARADDA HAWLAHA GUUD, Tr. 27 Majio 1975,
Naada Dhul — *Jaalle Axmed Buraale Faarax.* (83) » 459
- WASAARADDA HAWLAHA GUUD, Tr. 27 Majio 1975,
Naada Dhul — *Jaalle Khadiija Gaas Faarax.* (84) » 460
- MORODI - SOCIETA' PER AZIONI, Tr. 30 Majio 1975 —
Avviso di Convocazione di Assemblea Ordinaria. (85) » 460
- NATIONAL BOTTLING COMPANY - S.p.A. — *Ogeysiis
iusu yeerid shir Caadi ah.* (86) » 461
- SOCIETA' INCREMENTO PRODUZIONI AGRICOLE -
S.I.P.A., Tr. 30 Majio 1975 — *Avviso Convocazione di
Assemblea Ordinaria.* (87) » 461
- NATIONAL CARBON DIOXIDE S.p.A. - Tr. 30 Majio 1975
— *Ogeysiis isu yeerid shir Caad ah.* (88) » 462
- LIBAN S.r.l. - Sede in Chisimaio — *Avviso di Convoazione
di Assemblea Ordinaria.* (89) » 465
- SOCIETA' AGRICOLA BULO MERERTA - SABUM - Tr.
30 Majio 1975 — *Avviso Convocazione di Assemblea
Ordinaria.* (90) » 463
- SHINEMA «HODAN» S.p.A. Tr. 23 Majio 1975 — *Ogeysiis
isu imaatin Caadi ah.* (91) » 464
- FIAT SOMALIA S.p.A. Tr. 2 Junyo 1975 — *Isuyeeridda
Shirka Guud ee Caadiga ah.* (92) » 465

BOGGA KOWAAD

SHARCI

SHARCI L. 37, Tr. 4 Junyo 1975.
Awood siin.

GUDDOONSHAHA

GOLAHA SARE EE KACAANKA

MARKUU ARKAY Xaashida 1aad iyo tan 2aad ee Kacaanka 21 Oktoobar 1969;

MARKUU ARKAY Sharciga lamb. yahay 6 ee baxay 25-1-1968 ee lagu dhisa Wakaaladda Guryaha Ummadda;

MARKUU ARKAY Xeerka Madaxweynaha G. S. K. lamb. 24 ee soo baxay 25-12-1972;

ASAGOO TIXGELINAYA Go'aankii Golaha Sare ee Kacaanka iyo kan Xoghayayaasha;

WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga soo socda:

Qodobka 1aad

Wakaaladda gurayha Ummadda waxay awood u leedahay iney guri ama guryo ay leedahay ku wareejiso Wakaalad kale ee Madax Banaan ama shirkad ay Dawladdu abuurtay, gurigaas ama guryahaas oo ka mid noqon doona hantida Wakaaladda ama Shirkadda.

Qodobka 2aad

Haddii ay lagamamaarmaan noqoto, labo Wakaaladood oo madax banaan ama Shirkad ama Wakaalad ay Dawladdu sameysay way kala gadan karaan guri ama guryo iyadoo shuruudda lagu xiraayaa ay tahay iney Wasaaradda Maaliyadda iyo Guddi farsamadeed ay xaqiijiyaan iney kalagadashadaasi u dhacday si habboon inta aan heshiiska kala gadasha-da la meel marin.

Qodobka 3aad

Sharci kasta oo ka soo horjeeda ama ka horimaanaaya sharcigan, waa la buriyay.

Qodobka 4aad

Sharcigani wuxuu dhaqan galayaa marka uu Saxiixo Madaxweynaha G.S.K.

Muqdisho, 4 Junyo 1975.

GUDDOONSHAHA
GOLAHA SARE EE KACAANKA
Jaalle S. Cabdullaahi Maxamed Siyaad Barre

BOGGA LABAAD

X E E R

XEER MADAXWEYNAHA GOLAHA SARE EE KACAANKA
Tr. 25 Majio 1975, L. 75.

GUDDOONSHAHA

GOLAHA SARE EE KACAANKA

HADDAN ARKAY Xaashida kowaad ee Tawradda iyo Xeerka 1da ee 21kii Oktoobar 1969;

HADDAN ARKAY Sharciga Wakaaladda Dekedaha Soomaal iyeed ee L.R. kiisu yahay 1 ee soo baxay cedi Janaayo 1973 qodobkiisa 6aad.

G U D D O O N

Qodobka 1aad

Sida uu dhigayo qodobka 6aad ee sharciga Wakaaladda Dhedaha Soomaaliyed ee kor ku sheegan waxaa halkan ku dhisan Guddiga Sare ee maamulka Wakaaladda Dekedha Soomaaliyeed.

Qodobka 2aad

Guddigaasi wuxuu ka kooban yahay:

- | | |
|--|--------------|
| 1. Guddoomiyaha Wakaladda Dekedaha Soomaaliyeed | Guddoonshaha |
| 2. Maareeyaha Guud Wakaladda Dekedaha Soomaal. | Xbin |
| 3. Maareeyaha Guud Shirkadda Gaadiidka Badda
(National Shipping Line) | Xubin |
| 4. Maareeyaha Guud Wakaaladda Horumarinta
Xoolaha (Livestock Development Agency) | Xubin |
| 5. Maareeyaha Guud Wakaaladda Ganacsiga Um-
madda (National Agency for Foreign Trade) | Xubin |
| 6. Maareeyaha Guud Wakaaladda Muuska Ummadda
(National Banana Agency) | Xubin |
| 7. Maareeyaha Guud Bankiga Dhexe (Central Bank'
of Somalia) | Xubin |

Qodobka 3aad

Hawsha Guddiga waa sida ku tilmaaman sharciga Wakaaladda Dekedaha Soomaaliyeed L. R. 1 ee 7-1-1973 iyo wixii kale ee la soo darsa ama soo raaca.

Muqdisho, 25-5-1975.

MADAXWEYNAHA
GOLAHA SARE EE KACAANKA
Jaalle S. Gaas Maxamed Siyaad Barre

Xoghayaha Dawladda Wasaaradda
Kalluunka iyo Gaadiidka Badda
Jaalle Cismaan Jaamac Cali

WAAN ARAGNAY EE DIIWAANGELINAY
Diiwaanka lamb. 1, bogga lamb. 81.
Muqdisho, 1-6-1975.
Hantidhawrka Guud
G. Dhexe Cabdullahi Warsame Nuur

XEER WASAARADDA ARRIMAHA GUDAHA

Tr. 15 Majio 1975, L. 76.

Magacaabidda Guddiyada Kacaanka ee Degmooyinka.

XOGHAYAHA DAWLADDA

ISAGOO ARKAY Xaashida 1aad iyo tan 2aad ee Kacaanka 21ka Oktoobar 1969kii.

ISAGOO ARKAY Sharciga Lambarkiisu yahay 52 ee 8 Juun 72kii lagu naadiyey Faafinta Rasmiga ah ee 21-9-1972 kuna saabsan Maamulka Dawladda Hoose;

ISAGOO ARKAY Xeerka Wasaaraddan oo lambarkiisu yahay 12125 taariikh 13-12-1972kii oo hore loogu magacaabay qaybaha Wakiiladda Beesha ee Guddiyada Kacaanka Degmooyinka Bosaaso, Qardho, Qandala, Caluula, Iskushuban iyo Bender Beyle ee Gobolka Bari;

ISAGOO OGAADAY Inay lagama maarmaan tahay in la magacaabo Wakiiladda Beesha ee Guddiyada Kacaanka ee Degmooyinka Bosaaso, Qardho, Qandala, Caluula iyo Iskushuban, iyadoo la waafajinayo Qodobka 10aad Lambarkiisa 3aad, Xarafka (c) ee Sharciga kor ku tilmaan;

ISAGOO TIXGELINAYA Taladii uu soo jeediyey Guddiga Kacaanka ee Gobolka Bari;

WUXUU GOOYEY

Qodobka 1aad

Magacawga Guddiyada Kacaanka Degmooyinka Bosaaso, Qardho, Qandala Caluula iyo Iskushuban qaybahooda iyo Wakiillada Beesha.

Ka bilaabinta 20-10-1974. Dadka magacyadoodu hoose ku taxan yihiin waxaa loo magacaabay inay noqdaan xubno Guddiyada Kacaanka ee Degmooyinka ay ku hoos qoran yihiin:

DEGMADA BOSAASO

1. Jaalle Maxamed Cismaan Maxamed;
2. » Xaaji Geelle Faarax Shirwac;
3. » Xuseen Gurxan Geed (Colow);
4. » Cali Cumar Dubbe;
5. » Warsame Muuse Yuusuf;
6. » Geedi Aaden Sugulle;
7. » Abshir Cadame Idriis;
8. » Cabdi Xaaji Mire Xasan;
9. » Cabdi Cumar Shire;
10. » Yuusuf Mohamuud Nuux;

11. » Sheekh Maxamuud Cabdiraxmaan Yuusuf;
12. » Culimo Awaare Carraale;
13. » Iftiin Maxamed Xuseen Afcas;
14. » Maxamed Jaamac Maxamed (Weyrax);
15. » Axmed Jaamac Faarax;
16. » Saciid Cabdilleh Xasan;
17. » Maxamed Axmed Rooble (Curri).

DEGMADA QANDALA

1. Jaalle Cabdulqaadir Moxamuud Moxamed;
2. » Sheekh Gurxan Aadan;
3. » Xareedo Idriis Cali;
4. » Saciid Cabdullahi Yuusuf;
5. » Muumin Ibraahim Xasan;
6. » Khadara Moxamed Ciise;
7. » Shariff Ibraahim Cali;
8. » Abshir Saalax Yuusuf;
9. » Cumar Ismaaciil Cabdulle;

DEGMADA CALUULA

1. Jaalle Maxamed Saalax Dacar;
2. » Shire Jaamac Moxamed;
3. » Faarax Cilmi Faarax;
4. » Maxamed Maxamuud Yuusuf;
5. » Faaduma Yaasiin Jaamac;
6. » Xaliima Saciid Dheere;
7. » Guul Maxamed Shirwac;
8. » Yuusuf Cismaan Xaaji Yuusuf;
9. » Xaaji Yuusuf Ciise Cali.

DEGMADA ISKUSHUBAN

1. Jaalle Xaaji Muuse Cartan;
2. » Aaden Cali Faarax;
3. » Hujaale Axmed Yuusuf;
4. » Ciid Cawad Maxamed;
5. » Siyaad Xaaji Maxamed;
6. » Cabdulle Yuusuf Cumar;
7. » Xaaji Saalax Cumar;
8. » Xaaji Faaduma Cismaan;
9. » Xaalima Maxamed Yuusuf.

DEGMADA QARDHO

1. Jaalle Xasan Saciid Xasan;
2. » Moxamuud Moxamed Cali;

3. » Maxamed Faarah Barre;
4. » Bulxan Axmed Yuusuf;
5. » Axmed Moxamed Saalim;
6. » Ciise Xaaji Cumar;
7. » Marwo Firin Yuusuf;
8. » Buuxa Maxamed Faarax;
9. » Saciid Maxamed Yuusuf.

Muqdisho, 15-5-1975.

Qodobka 2aad

Dhaqan Gal

Xeerkanj wuxuu dhaqan gelayaa ka bilaabinta 20-10-1974ka, waana in lagu qoro Faafinta Rasmiga ah ee Qaranka.
Muqdisho, 15-5-1975.

Xoghayaha Dawladda
ee Wasaaradda Arrimaha Gudaha
S. Gaas Jaamac Maxamed Qaalib

WAAN ARAGNAY EE DIIWAANGELINAY
Diiwaanka Lamb. 1, Bogga Lamb. 80.
Muqdisho, 22 Maajio 1975kii.
Hantidhawrka Guud
G. Dhexe Cabdullahi Warsame Nuur

XEER WASAARADDA HAWLAHA GUUD

Tr. 2 Juun 1975, L. 77.

Dhul Dowladeed la siiyay, gacantana loo geliyay (Concessione e conseguente libera disponibilita) Axmed Maxamed Aaden, kuna yaal magaaladda Baydabo.

XOGHAYAHA DAWLADDA

ISAGA OO ARKAY Warqaddii Koowaad iyo tii labaad ee Kacaanka iyo Xeerka lamb. yahay 1 ee soo baxay 21kii Oktoobar 1969;

ISAGA OO ARKAY Xeer lamb. 50 soona baxay 26 Gennayo 1964;

ISAGA OO ARKAY Arjigii uu keensaday Axmed Maxamed Aaden, taarikhdeeduna ahayd 21-4-1973, kuna weydiistay dhismo, cad dhul Dowladeed, ku yaal Baydhabo;

ISAGA OO AQOONSAN Naadada dhulka, kuna saabsan cad dhul ah, la weydiistay, ogeysiis ahaana loogu dhajiyay looxa Guddoomiyaha Baydhabo, laguna qoray Faafinta Rasmiga ah ee Dowladda L. 15 soona baxday 1-6-1973, iyadoo aan cidna horistaagin;

ISAGA OO ARKAY Naqshadda ku saabsan dhismo dhagaxeed oo ay horay u aqoonsadeen Wasaaradda Hawlaha Guud, Waaxda Farsamada dhulka taarikhdeeduna ahayd 31-10-1973 kuna saabsaneed dhismo guri;

ISAGA OO ARKAY Bolleetada lamb. 114218 ee 31-10-1973 kana soo baxday Xafiiska Canshuurta Dadban, taas oo caddeyneysa in Axmed Maxamed Aaden uu bixiyay lacag dhan Shs. So. 493,45. Kuna saabsan qiimaha dhulka oo dhismaha loo siiyay;

ISAGA OO AQOONSAN Dhulka la weydiistay, kuna fadhiya mq. 488,45, loona tiriyay Axmed Maxamed Aaden sida ku cad xaashid ay qortay Waaxda Farsamada dhulka (Verbale di consegna) taarikhdeeduna aheyd 11-11-1973;

ISAGA OO ARKAY Warqadda ku qoran qaynunka siismada dhulka iyo naqshadda oo tiilmameyso dhulka isaga ah;

ISAGA OO ARKAY Xaqiijintii Farsamada ka tirsan Wasaaradda Hawlaha Guud Gobolka Bay, taarikhdeeduna ahayd 22-4-1975 taas oo caddeyneysa in naqshadda dhismaha oo ay waafaqsan tahay guriga;

ISAGA OO ARKAY Oggolaanta (Nulla Osta di abitabilità) degga-naashada guriga ku dhisan Baydhabo, laguna siiyay xaashid lamb. 108x14,75 ee 22-4-1975 kana soo baxaday Xafiska Caafimaadka Guud Gobolka Baydhabo, taas oo caddeyneysa in guriga wanaagsan yahay;

ISAGA OO AQOONSAN In la tixgeliyax wax allaale wixii waajib ahaa, kuna saabsan siismaha iyo gacan u gelinta dhulka Dowladda (Concessione e conseguente libera disponibilità) oo ay ujeeddadiisu aheyd dhis, wuxuu soo saaraya;

X E E R

Waxaa dhul Dowladeed la siiyay, gacantana loo geliyay, loona aqoonsaday Axmed Maxamed Aaden, dhul ku fadhiya mq. 488,45, kuna yaal magaaladda Baydhabo.

Muqdisho, 10 Maajio 1975.

Xoghayaha Hawlaha Wasaaradda Guud
W. S. Inj. Maxamed Xawaale Nadar

WAAN ARAGNAY EE DIIWAANGELINAY

Diiwaanka lamb. 1, bogga lamb. 13.

Muqdisho, 15 Maajio 1975.

Hantidhawraha Guud

G. Dhexe Cabdillahi Warsame Nuur.

XEER WASAARADDA GANACSIGA

Tr. 2 Junyo 1975, L. 78.

Diiwaan Gelinta Iskaashatada Ganacsiga Alaabta Farshaxanka «Wadajir»

XOGHAYAHA DAWLADDA

ISAGOO ARKAY Go'aanka 1aad iyo kan 2aad ee Kacaanka 21 Oktoobar 1969;

ISAGOO ARKAY Sharciga lambarkiisu yahay 40 ee Horumarinta Iskaashatooyinka Dalka Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya, oo dhaqan galay 4-10-1973;

ISAGOO ARKAY Arjigii uu soo qoray Guddoomiyaha Iskaashatada Ganacsiga Alaabta Farshaxanka, lagu magacaabo «Wadajir»;

ISAGO TIXGELINAAYA Taladii Guddiga Iskashatooyinka ee Gobolka Benaadir;

AMAR XEER

Qodobka 1aad

Iskaashatada Ganacsiga Alaabta Farshaxanka ee lagu magacaabo «Wadajir» saldhiggeda yahay Degmada Shingaani, ee Gobolka Benaadir, shaqadeeduna tahay inay ka ganacsato kana mushtarto oo ay dibedda u dhoofiso alaabta farshaxanka, waxaa laga diiwaan galiyey Xafiiska Iskaashatooyinka ee Wasaaradda Ganacsiga, taaso waafaqsan qodobka 15aad ee Sharciga Lambarkiisu yahay 40ka, oo dhaqan galay 4-10-1973.

Qodobka 2aad

Marka laga bilaabo maalinta Xeerkani lagu soo qoro Faafinta Rasmi-ga ah ee Dawladda, Iskaashatada Ganacsiga Alaabta Farshaxanka ee lagu magacaabo «Wadajir» waxay yeelanaysaa aqoonsi gaar ah oo Sharci ku dhisan; Xeer-Gaarkeeduna wuu dhaqaan galayaa.

Muqdisho, 2 Juunyo 1975.

XOGHAYAHA DAWLADDA

Jaalle Axmed Maxamed Maxamuud

XEER WASAARADDA GANACSIGA

Tr. 2 Juunyo 1975, L. 79.

Diiwaan Gelinta Iskaashatada Ganacsiga Muuska, lagu magacaabo «Benaadir».

XOGHAYAHA DAWLADDA

ISAGOO ARKAY Go'aanka 1aad iyo kan 2aad ee Kacaanka 21 Oktoobar 1969;

ISAGOO ARKAY Sharciga lambarkiisu yahay 40 ee Horumarinta Iskaashatooyinka Dalka Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya oo dhaqan galay 4-10-1973;

ISAGOO ARKAY Arijigii uu soo qoray Guddoomiyaha Iskashatada Ganacsiga Muuska, ee lagu magacaabo «Benaadir».

ISAGOO TIXGELINAAYA Taladii Guddiga Iskaashatooyinka ee Degmada Marka iyo kan Gobolka Shabeelaha Hoose.

AMAR XEER

Qodobka 1aad

Iskaashatada Ganacsiga Muuska, ee lagu magacaabo «Benaadir», saldhiggeedu yahay Marka, shaqadeeduna tahay Ganacsiga Muuska (guud ahaan Qudaarta Waddanka ka baxda oo dhan), Muuskaasoo ay ka soo iibsanayaan beeraleyda, oo ay markaasna ku ganacsadaan suuqyada Waddanka.

Qodobka 2aad

Marka laga bilaabo maalinta Xeerkani lagu soo qoro Faafinta Rasmi-ga ah ee Dawladda Iskaashatada Ganacsiga Muuska ee lagu magacaabo «Benaadir» waxay yeelanaysa aqoonsi gaar ah oo Sharci ku dhisan; xeer gaarkeeduna wuu dhaqangalayaa.

Muqdisho, 2 Juunyo 1975.

XOGHAYAHA DAWLADDA
Jaalle Axmed Maxamed Maxamuud

BOKAA SEDDEXAAD
TALOOPYIN ISGARSIIN OGEYSIIS IYO WIXII LA MID AH

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

N A A D A D H U L

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Sheekh Cosmaan Maxamed Xaji Buuwe, usoo qortay arji qaybta Dhismaha iyo Dhulka maalinti 26-3-1975, uu ku weydiisanayey dhul dhismo dowladeed kuna yaal Muqdisho xafadda Hawl Wadaag, oo leh qiyaas 30x30, kuna fadhiya 900 mdh.

Soohdin:

Waqooyi waxaa ka xiga Waddo.

Koofur waxaa ka-xiga Dor. Saalax.

Galbeed waxaa ka xiga Waddada Kacaanka.

Bari waxaa ka xiga Baafu.

Qofkii dannaynayaa wuxuu si fiican uga arki karaa naqashadda dhulka oo taal Qaybta Dhismaha iyo Dhulka ee Wasaaradda Hawlaha Guud, dhulka waxaa laga doodi karaa muddo ku siman 30 (soddon) maa-l mood, ee laga bilaabo maantii lugu naadshey buuga xeerka dawladda.

Muqdisho, 5 Maajio 1975.

Maamulaha Qaybta Dhismaha iyo Dhulka
Maxamed Cabdi Saciid

(80)

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

N A A D A D H U L

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Cabdullahi Axmed Maalim, u usoo qortay arji qaybta Dhismaha iyo Dhulka Maalintii 29-1-1975, uu ku weydiisanayey dhul dhismo dowladeed kuna yaal Muqdisho xafadda Yaaq-Shiid, oo leh qiyaas rektangolaar 21x19, kuna fadhiya 399 mdh.

Soohdin:

Waqooyi waxaa ka xiga: Jidka Ummadda.

Koofur waxaa ka xiga: Jid.

Galbeed waxaa ka xiga: Jid.

Bari waxaa ka xiga: Jid. 3 meytar ah.

Qofkii dannaynayaa wuxuu si fiican uga arki karaa naqashadda dhulka oo taal Qaybta Dhismaha iyo Dhulka ee Wasaaradda Hawlaha Guud, dhulka waxaa laga doodi karaa muddo ku siman 30 (soddon) maa-l mood, ee laga bilaabo maantii lugu naadshey buuga xeerka dawladda.

Muqdisho, 5 Maajio 1975.

Maamulaha Qaybta Dhismaha iyo Dhulka
Maxamed Cabdi Saciid

(81)

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

N A A D A D H U L

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Buraale Faarax, u usoo qortay arji qaybta Dhismaha iyo Dhulka maalintii 1-1-1975, uu ku weydiisanayey dhul dhismo dowladeed kuna yaal Muqdisho xafadda Hodan 5° Km., oo leh qiyaas rektangolaar 20x30, kuna fadhiya 600 mdh.

Soohdin:

Waqooyi waxaa ka xiga: Waddo.

Koofur waxaa ka xiga: Dhul lamb. Yahay 33.

Galbeed axaa ku xiga: Dhul lamb. Yahay 47.

Bari waxaa ku xiga: Dhul lamb. Yahay 46.

Qofkii dannaynayaa wuxuu si fiican uga arki karaa naqashadda dhulka oo taal Qaybta Dhismaha iyo Dhulka ee Wasaaradda Hawlaha Guud, dhulka waxaa laga doodi karaa muddo ku siman 30 (soddon) maa-l mood, ee laga bilaabo maantii lugu naadshey buuga xeerka dawladda.

Muqdisho, 27 Maajio 1975.

Maamulaha Qaybta Dhismaha iyo Dhulka

(82)

Maxamed Cabdi Saciid

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

N A A D A D H U L

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Axmed Buraale Faarax, u usoo qortay arji qaybta Dhismaha iyo Dhulka maalintii taariikhdu ahayd 23-2-75, uu ku weydiisanayey dhul dhismo dowladeed kuna yaal Muqdisho xafadda Hodan 5° Km., oo leh qiyaas rektangolaar ah 20x30, kuna fadhiya 600 mdh.

Soohdin:

Waqooyi waxaa ka xiga: Waddo.

Koofur waxaa ka xiga: Dhul lamb. Yahay 34.

Galbeed waxaa ka xiga: Dhul lamb. Yahay 45.

Bari waxaa ka xiga: Dhul lamb. Yahay 47.

Qofkii dannaynayaa wuxuu si fiican uga arki karaa naqashadda dhulka oo taal Qaybta Dhismaha iyo Dhulka ee Wasaaradda Hawlaha Guud, dhulka waxaa laga doodi karaa muddo ku siman 30 (soddon) maa-l mood, ee laga bilaabo maantii lugu naadshey buuga xeerka dawladda.

Muqdisho, 27 Maajio 1975.

Maamulaha Qaybta Dhismaha iyo Dhulka

(83)

Maxamed Cabdi Saciid

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

N A A D A D H U L

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Khadiija Gaas Faarax, u soo qortay arji qaybta Dhismaha iyo Dhulka maalintii 16-4-1975, uu ku weydiisanayey dhul dhismo dowladeed kuna yaal Muqdisho xafadda Wardhigley, oo leh qiyaas rektangolaa ah 20ee30, kuna fadhiya 600 mdh.

Soohdin:

Waqooyi waxaa ka xiga: Lootka lamb. Yahay 27 biis.

Koofur waxaa ka xiga: Waddo.

Galbeed waxaa ka xiga: Waddo.

Bari waxaa ka xiga: Lootka lamb. yahay 26 biis.

Qofkii dannaynayaa wuxuu si fiican uga arki karaa naqashadda dhulka oo taal Qaybta Dhismaha iyo Dhulka ee Wasaaradda Hawlaha Guud, dhulka waxaa laga doodi karaa muddo ku siman 30 (soddon) maa-l mood, ee laga bilaabo maantii lugu naadshey buuga xeerka dawladda.

Muqdisho, 27 Maajio 1975.

Maamulaha Qaybta Dhismaha iyo Dhulka

(84)

Maxamed Cabdi Saciid

MORODI — SOCIETA' PER AZIONI

Sede in Mogadiscio — Capitale Sociale Shs. So. 2.000.000,00

AVVISO DI CONVOCAZIONE DI ASSEMBLEA ORDINARIA

I Signori Azionisti della Società per Azioni «MORODI» sono convocati in Assemblea Ordinaria presso lo Studio Commerciale Rag. Arturo Salvi in Mogadiscio per il giorno 30 Giugno 1975, alle ore 10 in prima convocazione ed, occorrendo, in seconda convocazione per il giorno 28 Luglio 1975 alla stessa ora e nello stesso luogo per deliberare sul seguente:

ORDINE DEL GIORNO

1. — Relazione del Consiglio di Amministrazione e Rapporto del Collegio Sindacale;
2. — Bilancio e conto Perdite & Profitti dell'esercizio chiuso al 31 dicembre 1974 e deliberazioni relative;
3. — Nomina del Consiglio di Amministrazione;
4. — Nomina del Collegio Sindacale.

Hanno diritto di partecipare all'Assemblea come sopra convocata gli Azionisti iscritti nel Libro dei Soci almeno cinque giorni prima di quello fissato per l'Assemblea.

Mogadiscio, li 30 Maggio 1975.

IL CONSIGLIO DI AMMINISTRAZIONE

(85)

NATIONAL BOTTLING COMPANY — S. p. A.
Saldhigga: Muqdisho — Ra'sumaal Shs. So. 1.200.000,00

OGEYSIIS ISU YEERID SHIR CAADI AH

Sahmi qabayaasha Sharkadda National Bottling Company — S.p.A. waxaa la isu yeeray shirka caadiga ah oo lagu qaban doono xarunta Sharikadda ku yaal Jidka Lenin, maalinta 22ka Juunyo 1975 saacada markii ey tahay 10ka subaxnimo, fadhiga ugu horeeya, haddi taas suura galiwaayo, waxaa mar labaad la isu imaan doona maalinta 29da Juunyo 1975 isla saacada kor ku qoran; sii loga hadlo, go'aana loga gaaro arrimaha soo socda:

1. — Warbixinta Guddiga Maamulka iyo Guddiga Barayaasha;
2. — Hordhig Miisaaniyadda iyo Dhef-Deynta la xiray 31-12-1974;
3. — Magacaabid Guddiga Maamulka, iyadoo lahaddidaayo tirada xubinyada;
4. — Magacaabid Guddiga Barayaasha sida sharciga oo qabo;
5. — Wax alla waxii falanqeys uu baahdo.

Waxaa xaq uu leh in ay shirka ka soo qeyb ka galaan, sahmi qabayaasha ku qoran buuga Sharikadda ilaa shan maalmood ka hor maalinta fadhiga la qaban doono, oo na ilaa waqtigaas dhigaan shamiyaashooda Bankiga Ganacsiga Ummadda ee Muqdisho, ama xarunta Sharikadda.

Muqdisho, 30 Maajio 1975.

(86)

GUDDIGA MAAMULKA

SOCIETA' INCREMENTO PRODUZIONI AGRICOLE — S.p.A.
Società per Azioni — Sede Sociale in Scialambot
Capitale Sociale versato Shs. So. 112.000,00

AVVISO DI CONVOCAZIONE DI ASSEMBLEA ORDINARIA

I Signori Azionisti della Società Incremento Produzioni Agricole — S.I.P.A. — S.p.A., con Sede in Scialambot, sono convocati in Assemblea Ordinaria, presso l'Ufficio di Recapito della Società in Italia, Via Don Minzoni n. 8, Torino, per il giorno 28 Giugno 1975, alle ore 10 in prima convocazione ed, occorrendo, in seconda convocazione per il giorno 26 Luglio 1975 alla stessa ora e nello stesso luogo per discutere e deliberare sul seguente:

ORDINE DEL GIORNO

1. — Relazione del Consiglio di Amministrazione e Rapporto del Collegio Sindacale;

2. — Presentazione Bilancio e conto Perdite & Profitti chiusi al 31 dicembre 1974 e deliberazioni relative;
3. — Nomina di un membro del Consiglio di Amministrazione;
4. — Nomina di un Sindaco effettivo e designazione del Presidente del Collegio Sindacale.

Avranno diritto di intervenire all'Assemblea gli Azionisti iscritti nel Libro Soci almeno cinque giorni prima di quello fissato per l'Assemblea e che entro tale termine abbiano depositato le loro azioni presso la Sede Sociale o presso l'Ufficio di Recapito della Società in Italia.

Mogadiscio, li 30 Maggio 1975.

(87) IL CONSIGLIO DI AMMINISTRAZIONE

NATIONAL CARBON DIOXIDE — S.p.A.
Saldhigga: Muqdishi — Ra'asulkaal Shs. So. 240.000,00

OGEYSIIS ISU YEERID CAADI AH

Sahmi qabayaasha Sharikadda National Carbon Dioxida — S.p.A. waxaa la isu yeeray shirka caadiga ah oo lagu qaban doono xarunta Sharikadda ku yaal Jidka Lenin, maalinta 23ka Juunyo 1975 saacada markii ay tahay 10ka subaxnimoo haddi maalintaas la isu imaan waayay, waxaa la isu imaan doonaa 30ka Juunyo 1975 isla saacada hore, sii looga hadlo go'aanaa loga gaaro arrimaha soo socda:

1. — Warbixinta Guddiga Maamulka iyo Guddiga Barayaasha;
2. — Hordhig Miisaaniyadda iyo Dhef-Deynta la xiray 31-12-1974;
3. — Magacaabid hal Baare rasmi ah oo beddela mid maqnaaday iyo ilmaamidda Guddoomiyaha Guddiga Barayaasha;
4. — Wax alaa waxii falankeqs uu baahdo.

Waxaa xaq uu leh in ay shirka ka soo qeyb galaan, sahmi qabayaa-sha ku qoran buuga Sharikadda ilaa shan maalmood ka hor maalinta fadhiga la qaban doono.

Muqdisho, 30 Maajio 1975.

(88)

GUDDIGA MAAMULKA

LIBAH — s. r. l. — Sede in Chisimaio
Capitale Sociale Shs. So. 210,000

AVVISO DI CONVOCAZIONE DI ASSEMBLEA ORDINARIA

I Signori Soci della Società responsabilità limitata LIBAH, sono convocati in Assemblea Ordinaria presso la Sede Sociale per il giorno 30 Giugno 1975, alle ore 11, in prima convocazione ed, occorrendo, in seconda convocazione per il giorno 28 Luglio 1975, alla stessa ora e nello stesso luogo per discutere e deliberare sul seguente:

ORDINE DEL GIORNO

1. — Relazione dell'Amministratore Unico e Rapporto del Collegio Sindacale;
2. — Bilancio e Conto Perdite & Profitti dell'esercizio chiuso al 31 dicembre 1974 e deliberazioni relative;
3. — Nomina di un Sindaco e designazione del Presidente.

Avranno diritto di partecipare all'Assemblea come sopra convocata i Soci iscritti al Libro dei Soci almeno cinque giorni prima di quello fissato per l'Assemblea.

Mogadiscio, li 30 Maggio 1975.

(89)

L'AMMINISTRATORE UNICO

SOCIETA' AGRICOLA BULO MERERTA — SABUM — S.p.A.
Sede in Scialambot — Capitale Sociale Shs. So. 12.000,00

AVVISO DI CONVOCAZIONE DI ASSEMBLEA ORDINARIA

I Signori Azionisti della Società Agricola Bulo Mererta — SABUM — S.p.A., sono convocati in Assemblea Ordinaria presso gli uffici della Spett. S.I.P.A. in Scialambot per il giorno 27 Giugno 1975, alle ore 10, in prima convocazione ed, occorrendo, in seconda convocazione, per il giorno 25 Luglio 1975 alla stessa ora e nello stesso luogo per discutere e deliberare sul seguente:

ORDINE DEL GIORNO

1. — Relazione del Consiglio di Amministrazione e Rapporto del Collegio Sindacale;

2. — Presentazione Bilancio e conto Perdite & Profitti chiuso al 31 dicembre 1974 e deliberazioni relative;
3. — Nomina del Consiglio di Amministrazione e del Collegio Sindacale.

Hanno diritto di intervenire all'Assemblea coce sopra convocata gli Azionisti iscritti al Libro Soci almeno cinque giorni prima di quello fissato per l'Assemblea.

Mogadiscio, li 30 Maggio 1975.

(90)

IL CONSIGLIO DI AMMINISTRAZIONE

SHINEMA «HODAN» S.p.A.,

OGEYSIIS ISU IMAATIN CAADI AH

Shinema «HODAN» S.p.A., Saldhiggedu yahay Muqdisho, Ra sul-maalkeedu yahay shilin Soomaali 300.000, waxay ogeeysiineysaa;

Dadka qeeybaha ku leh Shirkadda Shinema Hodan S.p.A. oo saldhiggedu yahay Muqdisho in ay ka qayb galaan shir gudnimo oo caadi ah laguna qaban doono Saldhigga Shirkadda, maalinta 15aad ee bisha Juuniyo 1975, 10ka subaxnimo, waxaana laga hadlidoona waxyaalaha soo socda;

1. — Xogwarranka Guddiga Maamulka Guud iyo baarayaasha.
2. — Hordhigga Xaashida Miisaniadda iyo dheefta iyo khasaarada ee ku eg 31-12-1974, iyo wixii go'aan ah ee la xiriira.
3. — Magacaabidda Guddiga Maamulka Guud.
4. — Magacaabidda Guddiga Baarayaasha.

Waxaa xaq u leh inay ka soo qayb galaan fadhiga-dadka ku qoran buugga Shirkadda, ilaa 5 beri ka hor maalinta la isu imanayo.

Muqdisho, 23-5-1975.

(91)

GUDDIGA MAAMULKA GUUD

F. I. A. T. S O M A L I A - S. p. A.

ISUYEERIDDA SHIRKA GUUD EE CAADIGA AH

Waxaa la ogeysiinayaa dadka shamiga ku leh Shirkedda FIAT SOMALIA S.p.A. in maaalinta 18ka juunyo ee sannadkan saacadu markay tahay 9ka oo ahaan doonta isuimaatinka 1aad iyo maalinta 19ka juunyo isla saacadaa ay ahaan doonta isuimaatinka 2aad. Shirkaaso lagu qaban doono Xaruunta Shirkadda Fiat ee Muqdisho si looga doodo lana fuliyo arrimaha hoos ku qoran:

1. — Warbixinta Guddiga Maamulka;
2. — Warbixinta Guddiga Baarista;
3. — Oggolaashada Miisaaniyadda iyo Xisaabta fa'aidada iyo kha-saarada;
4. — Wax ka beddelka magacaawidda Lataliyaasha Maamulka oo magacaawna inta hawsha sannadka socotay (durante l'esercizio).
5. — Iyo wixii kale oo raaca.

Muqdisho, li 2 Juunyo 1975.

(92)

GUDDIGA MAMULKA
